

XEERKA XARUNTA
XARUNTA DARYEELKA AGOONTA
IYO NAAFADA EE LUQMAAN



مركز لقمان لرعاية الأيتام والمعاقين
LUQMAN CENTER FOR ORPHAN AND DISABLED CARE

MUQDISHO
2024

MASAWIRKA MUHUBO LIBAN HASSAN MASAWIRKA ABDULLAHI MOHAMED ABUKAR,



مركز الرعاية الصحية العامة
PUBLIC HEALTH CARE CENTER

2023

**UJEEEDO: DHISMO XARUN LAGU MAGACAABO LUQMAAN OO SHAOADEEDU
TAHAY DARYEELKA AGOONTA IYO NAAFADA.**

Maanta oo ay taariikhdu tahay 01/01/2024, Anigoo ah Dr. Maxamed C/laahi Maxamed “Max’ed Nootayo”, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha dhabarka Danbe ee Hotel Waheyn ee Magaalada Muqdisho, Waxaa Xafiiskeyga iigu yimid ayagoo heshiis ah, dadka Soomaaliyeed ee kala ah:-

1. MUHUBO LIBAN HASSAN, Somali ah, ku dhalatay Muqdisho, sanadkii 1992, Ina Amino Bashir Olad, lehna Warqadda Dhalashada Lr.294138 ee D/H/Xamar.
2. ABDULLAHI MOHAMED ABUKAR, Somali ah, ku dhashay Muqdisho, sanadkii 1990, Ina Abshiro Mohamud Hassan, lehna Passport lambarkiisu yahay P01167273.

Dadkaas kor ku xusan iyaga oo caafimaad qaba, xiskoodu taam yahay, cid khasabtayna aysan jirin qowl iyo ficilba, waxay i waydiisteen inaan u qoro heshiis ku saabsan dhismo sharci Xarumeed oo ka kooban qodobada hoos ku xusan:

Qodobka 1aad

MAGACA XARUNTA

Magaca xarunta ay ku howlgaleyso waa LUQMAAN CENTER FOR ORPHAN & DISABLED CARE, tarjumadiisa afka carabiga waa (مركز لقمان لرعاية الأيتام والمعاقين). Afka soomaaliga waxaa loogu yeeraa XARUNTA DALYEELKA AGOONTA & NAAFADA EE LUQMAAN waxaana loo soo gaabin karaa XARUNTA AGOONTA LUQMAAN Magaca iyo summada xarunta ayaa loo adeegsanayaa dhamaan warqaradaha ka soo baxaya xarunta, heshiisyada ay dhinac ka tahay xarunta, iyo daabcadaadaha kale.

Qodobka 2aad

NOOCA XARUNTA

Waa xarun samafal (aan macaash doon ahayn) oo ku hawlan sidii ay caruurta agoonta iyo kuwa naafada ah ay u heli lahaayeen daryeel bulsho oo dhamaystiran sida waxbarasho, barbaarin, caafimaad, iyo tababar la xiriira shaqooyinka. Howlahaas oo ujeedkoodu tahay inay caruurta si joogto ah u helaan barbaarin wanaagsan ilaa ay ka noqdaan tiir anfacaaya qoysaskooda iyo bulshada ay ku dhex nool yihiin insha allah.

Qodobka 3aad

ASTAANTA GAARKA AH EE XARUNTA

Astaanta xarunta waxay u gaar tahay kaliya xarunta Luqmaan, mana jirto cid lawadaagi karta. Waxayna u muuqanaysaa qaabkaan soo socda:



مركز لقمان لرعاية الأيتام والمعاقين
LUQMAN CENTER FOR ORPHAN AND DISABLED CARE

Oodobka 4aad
GOOBTA AY KU TAALLO XARUNTA

Saldhiga Xarunta Luqman wuxuu ku yaallaa magaaladda Muqdisho - Soomaaliya, waxayna xafiisyo iyo laamo ku yeelan kartaa dalka gudihiisa iyo dibadiisa hadii loo baahdo.

Oodobka 5aad
UJEEDDOOYINKA XARUNTA

1. Daryeelista agoonta ku nool Soomaaliya iyo kafaala-qaadkooda dhinacyada nolosha gaar ahaan waxbarashada, caafimaadka, iyo hoyga.
2. Bixinta waxbarasho aad u sarreysa oo la siinaayo caruurta agoonta ah iyo xanaaneyntooda.
3. Wacyi-gelinta iyo tarbiyeynta caruurta agoonta si ay u noqdaan caruur dhowrta shareecada islaamka iyo anshaxa suuban ee Soomaaliyeed.
4. Kormeerista goobaha ay waxbarashada ku qaataan agoonta iyo kuwa naafada ah, si loo siiyo kaalmo iyo dhiiro-gelin waxtar leh.
5. Daryeelista caruurta naafada ah si ay u helaan taageerada ay u baahan yihiin oo dhinaca caafimaadka ah.
6. Helitaanka mutadawiciin kala duwan oo kafaalo-qaada caruurta agoonta ah.
7. Diyaarinta, horumarinta iyo daabacista cilmi-baarisyo, iyo daraasaad la xiriira howlaha ururka.
8. Bixinta howlo samafal oo aad u hufan lana jaan-qaadi karta waayaha.

Oodobka 6aad
WAQTIGA JIRITAANKA XARUNTA

Xarunta Agoonta Luqmaan waxaa la aas-aasay sanadkii 2017, muddada jiritaankeeduna waa mid furan, waxayna ku baabi'i kartaa faqrooyinka ku qoran qodobka 18'aad ee isla xeerkaan.

Oodobka 7aad
DHAQALAHA XARUNTA

Xarunta Luqmaan waa urur samafal oo aan macaash dhaqaale raadinaynin, hase yeeshee waxay tabarucaad iyo dhaqaale ka helaan xubnaha Luqmaan iyo mutadawiciin kale. Waxaana dhaqaalahaas lagu bixinayaa kaliya howlaha la xiriira u-gar-gaarista iyo daryeelka agoonta iyo dadka naafada ah oo ay xaruntu gacanta ku hayso.

Oodobka 8aad
AGABKA XARUNTA

Waxii hanti ee isugu jira Guurto iyo Maguurto sida guryo, dhulal, gaadiid, qalab iwm oo ay xaruntu leedahay waxaa lagu qorayaa magaca Xarunta oo kaliya.

Oodobka 9aad
QAAB-DHISMEEDKA MAAMULKA XARUNTA

Xarunta Luqmaan waxay leedahay qaab dhismeed maamul oo ka kooban:

1. **Golaha Agaasinka** (Board of Directors) oo ah aas-aaseyaasha xarunta,
2. **Golaha Fulinta** (Executive Committee) oo ka kooban Maamulaha Xarunta iyo Agaasime Waaxedyada hogaaminaaya waaxyaha ay xaruntu ka kooban tahay.

Qodobka 10aad

GOLAHA AGAASINKA (BOARD OF DIRECTORS)

Golaha Agaasinka waa mas'uulka koowaad ee xarunta, waxayna u taagan yihiin ilaalinta danaha xarunta. Awoodaha golaha agaasinka waxaa ka mid ah:

1. Dejinta yoolalka guud ee xarunta.
2. Dejinta, ansixinta iyo wax ka-bedelidda xeerarka u dagsan xarunta Luqmaan.
3. Magacaabista & xil ka qaadista golaha fulinta (oo uu kuu jiro Maamulaha Xarunta).
4. Magacaabista & xil ka qaadista guddiga hanti-dhowrka ee xarunta.
5. Taageerista agaasimaha guud si uu u guto waajibaadkiisa.
6. Ka doodista iyo meel marinta heshiisyada ay dhinac ka tahay xarunta Luqmaan.

Qodobka 11aad

GOLAHA FULINTA (EXECUTIVE COMMITTEE)

1. Golaha Fulinta xarunta Luqmaan, waa gole qaabilsan maareynta & maamulidda howlaha iyo dhaqaalaha xarunta, waxey ka imaan karaan Aas-aasayaasha, Golaha Agaasinka ama Xirfadley dibadda ka ah xarunta.
2. Agaasimayaasha golaha fulinta waxay xilka haynayaan muddo labo sano ah qofkiiba oo la cusbooneysiin karo hadii ay isku raacaan golaha agaasinka.
3. Waxaa la sameyn doonaa sharciyo gaar ah oo qeexaya waajibaadka iyo awoodaha ay leeyihiin hanti-dhowraha iyo shaqaale kasta oo magacaaban.

Qodobka 12aad

GUDOONKA XARUNTA

Gudoomiyaha xarunta waxaa loo magacaabay MUHUBO LIBAN HASSAN, oo jagadaas haynaysa ilaa laga badalayo waxayna awood buuxda u leedahay:

- Maamulista howlaha guud ee xarunta,
- La macaamilka hay'adaha iyo dawladaha ay dani ugu jirto xarunta Luqmaan,
- Furista xisaab banki ay leedahay xarunta waxayna u saxiixi kartaa jeegaga, lacag ayay ku shubi kartaa kana saari kartaa xisaabta xarunta,
- Waxay u soo iibin kartaa una sii gadi kartaa xarunta hanti nuuc kasta guurto iyo maguurto.

Qodobka 13aad

CODADKA XUBNAHA GOLAHA FULINTA AH

1. Codaynta shir kasta waa qaab gacan taag ah, haddii aysan jirin codsi ka yimid qaar kamid ah xubnaha metelaya golaha markaas oo laga dhigi karo qarsoodi.
2. Go'aanka kama danbeysta ah waa midka lagu gaaro codeyntaas.

Qodobka 14aad

KAL-FADHIYADA GOLAYAASHA

1. Kal fadhiga golaha agaasinka wuxu qabsoomayaa sanadkiiba 3 jeer (afartii bilood hal mar).
2. Golaha fulinta waxay kal-fadhi yeelanayaan labadii biloodba hal mar inta ay shaqada xarunta si fiican uga soconeyso, kuwaasoo aanay ku jirin shirarka kale ee dhacaya.
3. Kooramka kalfadhiyada golayaasha wuxuu ku qabsoomayaa shirarka aan caadiga aheyn 2/3, shirarka caadiga ahna wuxuu ku qabsoomayaa 50+1.

Qodobka 15aad
GO'AAN GAARIDDA

1. Go'aan gaarida wuxuu ku ansaxayaa 2/3 (saddex meelood laba meel) marka wax laga beddelayo xeerarka guud ee xarunta, inta kale go'aanka waxa lagu gaarayaa cod hal dheeri ah (50 + 1).
2. Xubintii maqnaata waxay u hogaansamaysaa natiijada shirka ka soo baxday.

Qodobka 16aad
LUMINTA XUBIN-NIMADA GOLAHA FULINTA

1. Xabintu waxay ka baxaysaa golaha hadii ay qoraal ku soo codsato.
2. Haddii ay ku xadgudbto xeerka iyo nidaamka u degsan xarunta.
3. Haddii ay ku caddaato inay ku takrifashay hantida ama sumcadda xarunta.

Qodobka 17aad
XUBINTII GEERIYOOTA

Qofkii geeriyooda ee xarunta ka mid ah waxaa booskiisa buuxin kara cidda ama qofka dhaxalkiisa leh oo la yimaada Caddeyn qoraal ah oo ay soo qoreen Maxkamad ama hay'adaha ku shaqada leh waana in dhaxaltooyadiisu ay keensadaan qof wakiil uga noqda xarunta.

Qodobka 18aad
BAABI'INTA XARUNTA

Xarunta waxay ku baabi'i kartaa marka la helo mid kamid ah qodobadaan soo socda:

1. Go'aan baabi'in ah oo ka soo baxa xubnaha aas-aasayaasha iyo golaha agaasinka.
2. Haddii uu soo baxo sharci dawladeed oo baabi'inayo xarumaha noocaan oo kale ah.

Qodobka 19aad
QAABKA BAABI'INTA XARUNTA

1. Waa in la joojiyaa qabashada mashruucyo cusub, kuwii horena waa in lagu soo gaba-gabeeyaa mudo cayiman oo la isla gartay.
2. Waa in laga bixiyaa wixii qarash ah oo xarunta lagu leeyahay hadii ay jiraan.
3. Waa in guddi farsamo loo saaraa howshaas baabi'inta xarunta ah, gudigaas oo aqoon iyo khibrad durugsan u leh arintaas laguna wada kalsoon yahay.

Qodobka 20aad
XALINTA KHILAFAADKA

1. Khilaafka waa in aan la buun-buunnin, dibadda xaruntana aan loo saarin.
2. Khilaaf kasta waa in lagu xaliyaa muddo gaaban iyadoo aanan marna loo hakin karin howlaha socda ee xarunta nooc kasta oo ay ahaadaan.



Qodobka 21aad
SHARCIGA IYO LUQADDA HESHIISKA

1. Luqadaha uu heshiiskani ku qoran yahay waxaa asal u ah luqadda Soomaaliga.
2. Heshiiskan wuxuu ka kooban yahay 22 qodob oo ku qoran 5 bog.
3. Wixii aan ku qornayn sharcigaan dhismaha xarunta waxaa loo raacayaa xeerka hay'adaha samafalka iyo sharciga xarumaha ee dalka u degsan.
4. Wixii fasiraad ah waxaa lala kaashanayaa dadka ay xirfadoodu tahay hawshaan.
5. Nuqulka af-soomaaliga oo ay saxiixeen dhammaan xubnaha aas-aasayaasha xarunta waxaa lagu keydinayaa xafiiska xarunta guud ee Luqmaan.

Qodobka 22aad

SAXIIXA AASAASAYASHA XARUNTA LUQMAAN

Ka dib markii ay aas'aasayaashu akhriyeen qodobada uu ka kooban yahay xeerkaan, waxay Nootaayada horteeda ku saxiixeen heshiiskaan ujeedadiisu tahay dhismo Xarun lagu magacaabo LUQMAN CENTER FOR ORPHAN AND DISABLED CARE.

Lb.	MAGACYADA AAS-AASAYAASHA XARUNTA	SAXIIXA
1.	MUHIIBO LIIBAAN HASSAN (AHNA GUDOOMIYAHA XARUNTA)	
2.	ABDULLAHI MOHAMED ABUKAR (AHNA GUDOOMIYE KU-XIGEEN)	

SUGITAANKA NOOTAAYADA

REP: 938/TPN/24 Tr. 01/01/2024, Muqdisho. Aniga oo ah Nootaayaha Tayo:- Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo", waxaan halkan ku caddeynayaa in heshiiskan dhismaha sharciga Xarunta ee kor ku xusan uu yahay mid sax ah oo waafaqsan shareecada islaamka iyo qaanuunka dalka. Islamarkaana ay saxiixeen aas-aasayaasha xarunta, nootaayaduna waxey hubisay magacyadaas inay yihiin kuwii dhabta ahaa ee lahaa saxiixyadan kor ku xusan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

SAXIIXA NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"





**DOWLADDA HOOSE EE MUQDISHO
MUNICIPALITY OF MOGADISHU**

WARQADDA SUGNAANTA

Certificate of Identity Confirmation

**DUQA MAGAALADA MUQDISHO WUXUU CADEYNAYAA IN SAWIRKA IYO SUUL SAARIDDA
HOOS KU TILMAAMAN UU YAHAY QOFKA HOOS KU XUSAN:**

(The Mayor of Mogadishu hereby certifies that the person whose picture and thumb print appears below has the following details:)

MAGACA Full Name	MUHUBO LIBAN HASSAN
TAARIKHDA DHALASHADA Date of Birth	01-Jan-1992
GOOBTA DHALASHADA Place of Birth	MOGADISHU
NUMBERKA KAARKA AQOONSIGA ID number	294138
JINSI Gender	Female
XAALADDA GUURKA Marital Status	Married
DEGGAN Address	Wadajir
MAGACA HOYADA Mother's full Name	AMINO BASHIR OLAD
TAARIKHDA LA BIXIYAY Date of Issue	21-July-2022
SHAQADA Occupation	GURI JOOGTO



Right Thumb Print

Duqa Magaalada ee Muqdisho
Mayor of Mogadishu

Cumar Maxamuud Maxamed

[Handwritten signature]

